# Sheekadii Magan Suldaan Guuleed “Magan-Gaabo” (circa 1790-1840)



Suldaan waa intay saantu qoyantay
Qoysna boqorkuu leeyay qabiilna xulashada
Suldaan dooyaysan lagama doodo
Ugaas ku arkaaya eedi lama qaado
Garaad aan lagu heshiin geed lama keeno

**Siday taariikhda laga soo wariyey boqortooyada reer sheekh Isxaaq waxa hayay reerka Toljeclo ilaa qarnigii 17naad dhamaadkiisii (1690), Boqor Dhuux Baraar ayaa ugu danbeeyay Tol**

**Jecl ah. Lama hubo lamana hayo boqoradii ka horaysay Dhuux magacyadooda iyo reerkay ka soo jeedeen , iyo inayba ahaayeen isla reerka Boqor Dhuux. Ha yeeshee waxa Somali buug laga qoro ama lagu soo magac qaado madaxa-dhaqameed Isaaq ugu horeeyay buugi qoray Shihaab Al Diin al-Jeezaani ee la odhan jiray Furitaankaa Xabasha (Futuux Al-Xabasha), waxa hubaal ah eriga "Suldaan" inaan la isticmaali jirin ka hor Turkishkii , aduunyada Islaamka waxa erigaas ku fidiyay waa maamulkii Cusmaaniyada , inkastoo Islaamku erigaas Suldaan ugu horeeyay isticmaalkiisa Salaax Al-Diin al-Ayuubi markii u inqilaabay Faadimiyiintii oo ayagu sheegan jiray Ahl-Beyt boqorkooduna darajada Khaliif qaadan jiray, maadaama Salaax Al-Diin Kurdish ahaa shaqana ku lahayn sheegashada Khaliif wuxu isku magacaabay Suldaan , ka dibna Mamaaliikidii oo ahaa (boqortooyada Adoonta laga keenay Asia/Ruushka ) ayaa erigii suldaan sii dhaxlay ilaa qarnigii 1400kii oo la wareegeen Turkishku. Somalida kolay erigaasi kama horeyn 1700kii wakhtigaas oo kolay dhankaas Turkishka inaga soo gaadhay erigu (erigaas Carabta waa looga horeeyay).**

**Futuux Al-Xabasha hadaynu u soo noqono erigay Habar-Maagduu u yaqaaneen madax-dhaqmeedkooda ama badanaa somaliduba wuxu ahaa "Garaad" , laba Garaad oo Habar-Magaadle ah ayuu Shihaab Al-Diin buugiisa ku sheegay midna dagaalada bilowgooda ku jiray midna dagaaladii Axmed Gurey dhamaadkoodii Garaad. Markii Axmed Ibraahim Al-Ghaazi jihaadkiisii u horeeyay bilaabmay dadyowgii Somali ee bilowgii raacay wuxu Shihaab Al-Diin sheegay in reerka Isaaq oo Garaadkoodii ahaa Axmed Gerri Garaad Xuseen u horeeyeen. wuxu u soo tebiyay sidatan.**

**Jihaadkii 4aad:**

**Qabiilkii ugu horeeyay ee u soo gurmada Imaamka waxay ahaayeen Habar Magaadaa ayagoo u wato suldaankoodu Axmed Gerri Xuseen. Waxay dageen meel la yidhaahdo Qasha oo buuraa dooxada Harar ka saraysa. Waxay ku xaragoodeen hubkoodii iyo qalabkay siteen ayagoo faradhooda jarraynaya. Waxay ahaayeen abaanduulayaal aan loo dhigin abaanduulayaal, iyo ciidan aan ciidan loo dhigin. Imaamkii ayaa aad iyo aad ugu faraxay gurmadkooda, Waxay Imaamka ula kulmeen fool ka fool si diirana wuu u soo dhaweeyay, wuxu siiyay dun iyo sahay suldaankoodiina wuxu hadayad u siiyay hulaab aad u qurux badan . Buuga Furitaanka Xabasha u qoray Shihaab Al Diin Axmed Abdul Qaadir boga 43naad.**

**Waxa Garaadkaas ku xigay Garaad Daawad ama Daauud oo jihaadkii 7aad ka qeyb qaatay mudo ilaa dhowr iyo toban sanadood ka**

**danbeeyay Garaad Axmed Xuseen, isagoo arintaas ka hadlaya wuxu Shihaab al-Diin yidhi:**

**Jihaadkii 7aaad:**

**Ninka sheekada noo soo tebiyay Ilaahay haw naxariistee wuxu yidhi markii u imaamku hadana niyaystay inu duulaan danbe ku qaado Xabashida kuna dhaartay inaanu ka soo laabanayn dhulka Kiristaanka geeri mooyaane. Wuxu marsada Zaylac ka codasday hub dagaal iyo seefo iyo wixii la mid ah.Wuxu u baahnaaba waa loo keenay waxana ka mid ahaa 7 madfac (cannon) Todabaatan nin baa ka yimi Mahara oo jihaadka damcsanaa, hogaamiyahoodu wuxu ahaa Sacbaan Al Mahari iyo Axmed Ina Saleemaan Al Mahari iyo hogaamiyii reerkayga Shariif Muhammed Ina Axmed. Ka dib ayuu imaamku somalidii iyo qabiilada dagaaanka Xarla warka gaadhsiiyay.Qabiilkii ugu horeeyay ee yimaada waxay ahaayeen Habar Magaadaa ayagoo u hogaaminaayo Garaadkoodu Dawit (Daawad) oo wata 50 fardoolay ah iyo 500 oo ciidan, ka dibna waxa yimi Mareexaanka u hogaaminaayo Axmed Ina Xiraabo oo wata 80 faras iyo todaba boqol oo ciidan ,ka dibna waxa ku xigat Gurguraa u hogaaminaayay Garaad Caabid oo wata 30 fardoolay iyo kun ciidan, ka dibna waxa yimi qabiilka Geri uu hogaaminaayay Garaad Mataan oo wata sideetan fardoolay iyo kun ciidan. Buuga Furitaanka Xabasha u qoray Shihaab Al Diin Axmed Abdul Qaadir boga 122-123.**

**Marxaladaas oo hogaan dhaqameedku ahaa “Garaad” waxa la odhan karaa ugu yaraan Axmed iyo aabihii Xuseen ba oo noolaa badhtamii 1400kiiba inay isla darajadaas Garaad isticmaali jireen. Eriga Garaad waxa reer Isaaq ah isticmaalkiisa ugu danbeeyay reerka Habar Awal wixii ka horeeyay 1900kii , Garaadkii ugu danbeeyay wuxu ahaa Garaad Cabdalla Garaad Boon oo ahaa reerka Axmed Cabdalle ee hayay saladanada guud ee Habar-Awal. Garaad Cabdalla isagoo d’a ah waxa la hubaa inu noolaa ilaa 1894kii ( Buuga Soldier’s Shikar trips) wixi ka danbeeyay Garaad Cabdalla Habar Awal waxa Suldaan u noqday Suldaan Diiriye Garaad oo aanu filayo inu ahaa Ina Garaad Cabdalla ama ay walaalo ahaayeen Garaad Cabdalle , laakiin Diiriye xilka Suldaan isagaa ugu horeeyay.**

**Sida kale waxa loo dhigi karaa erigaas wuxu hogaan-dhaqameedka Isaaq ugu danbeeyay Garaad Cabdalle Garaad Boon. Ma hubo imanay soo gaadhin in xidhiidh ka dhaxeeyay Garaadnimadii Habar Magaadlaa ee qarniyadii hore sida Garaad Axmed , Garaad Daawad iyo Garaad Xuseen ee qarniyadii 1500kii wixi ka horeeyay iyo tan Axmed Cabdalle . Waxa dhici karta in Isaaqu ayagoo Garaadku u sareeyay wakhtiyadii danbe ay ku badaleen Boqor oo loo**

**wareejiyay ama la wareegeen reerka Tol-Jeclo. Hadii aynu xasuusta ka miisaano dadku waxay xasuustaan, maadaama la xasuusanyay sheekada Boqor Dhuux Baraar aan la xasuuusanayn Garaaddnimadii ka horaysay siday u badantay markaas waxa weeye Boqortooyada Dhuux Baraar iyo saldanada Suldaan Guuleed cabdi wax badan uma dhaxayn oo waa isku xigeen.**

**Garaad Daawad iyo Suldaan Axmed Gerri Xuseen wuxu buugaas la qoray 1534kii ama qarnigii 16naad ku tilmaamayaa inay hogaaminayeen reerka Habar Magaada ee kala ah Arab, Awal, Ayuub iyo Garxajis inakoo ogsoon inu Shihaab Al Diin buugisa ka qoray xasuus nin kale oo sheekada u soo tebiyay lama odhan karo labadaas suldaan Habar Magaado ayay ahaayeen lagamna dhugan karo inay afarta reer ee kale ee Isaaq Habar Xabuusho ee kala ah Cibraan (maxamed), Muuse, Maxamed iyo Sanbuur (Ibraahin) inay lahaayeen hogaan dhaqan oo gaar ah, waxa dhici kartaba inay labadaas hogaamiye dhaqanba ahaayeen salaadiintii ka horaysay Dhuux Baraar maaadma laga soo gaadhay taariikhda saldanada Isaaq , isaaq oo dhan oo le 1 suldaan oo ahaa Suldaan Guuleed markii Dhuux Baraar laga xayuubiyey boqortooyada dhamaadkii qarnigii 17naad. Mudadaadas intii ka horaysay iyo intii ka danbaysay oo ahayd 150 sanadood ilaa Dhuux Baraar saldanada somali oo dhan mugdi baa halkaas ku jira oo magacyadoodu xasuus laguma hayo.**

## Dagaalkii Lafa Ruug “Colka Wadhaf Ma Lagu Dayay”

**Taariikhda “oral-ka” waxa magacayada Dhuux Baraar iyo Cabdi Ciise maqalkooda ugu horaysay dagaaladii Lafa-Ruug, hasayeeshe wakhtigay dhaceen dagaaladaasi Isaaq iyo Daarood siday guusha ninba u sheegato si gaar ah ayay qaarba wakhti ka dhigaan, tusaale reerka Daarood waxay yidhaahdaan dagaaladaas waxa hogaaminayay dhankooda Ugaas Nuur Cabdhuiye iyo Jiir-Carlaale Amaadin, laakiin markay qiyaastooda sheegtaan waxay ka dhigaan inay ahayd badhtamii ama bilowgii 1800, dhanka Isaaq waa 100 sanadood ka hor ilaa 1750’s, sidaan taariikhda u hubo suurta-gal noqon mayso (inkastooy Gabayo tiriyaan Daaroodku ay leeyiin Nuur Cabudhiye baa ka tiriyay Lafa Ruug) in Cabdi Ciise iyo Boqor Dhuux Baraar oo halbowle ka ah dagaaladaas Lafa Ruug inay soo gaadheen 1800kii oo dhawaan ah. (Taas lafteedu waxay u bahaantahay sixid badan ,) waxa hubaal ah in Lafa-Ruug ka horaysay suldaan Guuleed oo suldaan ahaa dhamaadkii 1770gii ilaa dhamaadkii 1820’.**

**Nin wadaad ah oo ahlu diin ah suufinimana lagu tilmaamo ayay siday odayaashu sheegaan markii saldanada laga xayuubiyey Dhuux**

**Baraar isagii lala damcay, Cabdi Ciise (circa 1680-1760) wuxu ku soo caan baxay dagaaladii Lafo Ruug ee dhex maray beelo Isaaq ah iyo beelo Daarood ah dagalaadaas waxa lagu qiyaasaa dhamaadkii qarnigii 17naaad ama bilowgii qarnigii 18naad. Cabdi Ciise saldanada tiro na laguma siin oo Tol Jeclaba reer badan ma ahayn hasayeeshee daganaasho, xikmad iyo dulqaadnimo iyo diinta oo ku xil dheeraa sidaas awgeed baa loogu doortay in saldanada loo caleemo saaro, Cabdi Ciise waa ka meermeeraystay inu xilka intaas leeg qabto, lama hubo inu si ku meel gaadh ah u hayay saldanada , lamana hubo inu suldaan ba ahaa oo suldaan loogu yeedhi jiray se waxa la hubaa inu caruurtiisa kii ugu yaraa ee ay u dhashay afadiisii ugu weynayd Iido Cagaweyn (Ogaadeen) inu saldanada ka dhaxlo, waxaana la hubaa oo kale inaan suldaan Isaaq u dhaxayn Dhuux Baraar iyo intii Cabdi Ciise xilkaa la siiyay, hasayeeshee Cabdi Ciise saldanad wuu diiday inu qabto hadana si suldaan ku meel gaadh ah Guuleed ka hor waa u talin jiray, .**

**Suldaan Guuleed mudo aad u dheer ayuu saldanada Isaaq hayay waxaanu ahaa Suldaan Isaaq oo dil caleemo saareen.Suldaan Diiriye Sugule 1810kii waagaas ayaa isna Habar Yoonis gaar u caleemo saartay, waxa se ka horeeyay Sugulle oo isagu Habar Yoonis caleemo saarin se kaligii Suldaan isu boqray (sidu buugiisa ku sheegay Drake Brockmen, British Somaliland). Diiriye marna Guuleed uma aqoonsanayn suldaan, Guuleedna laftiisu oo suldaankii guud ah  uma aqoonsanayn suldaan Diiriye. Waayadii danbe labada saldanadoodba way is barbar socdeen se midna mid Isaaq bay ahayd midna mid Siciid Garxajis. Nin Muuse Care ah baa la yidhahaadaa wuxu yidhi "hadaan Diiriye Guuleeda dayn Guuleedna Diiriyeda dayn xabaashaa Iido waa xabaalo lagu dar" isagoo u jeeda inaanay mar hadii labadooda midna suldaan ka kale odhanayn inu midi u hadho oo geeri ku hadho.**

**Suldaan Guuleed saldanada Isaaq wuxu hayay mudo aad u dheer oo kor u dhaaftay 50 sanadood marku qabtayna wuxu ahaa nin yar oo. Markay taarikhdu qiyaastii ahayd 1820's ayaa Suldaan Guuleed Cabdi (dh. 1730) oo d'a ah xanuunsaday, wuxu caruur dhalay Guuleed 12, oo 8 bahood ah Rooble curadka yahay Diiriye na ugu danbeeyay:**

**1-Rooble waa curadka (Ba-Cawrala)**
**2-  Ducaale, Faarax ,Cali iyo Cabdi (Ba-Canbaro)**
**3-Jaamac, Yuusuf ,Cigaal (Ba-Saleebaan)**
**4-Warfaa (Ba Bartire)**
**6-Ma gan Gaabo (Bah Gooniya)**
**7-Gaataa (Bah Gooniya)**

## 8- Diiriye (Ba Muuse Care)

**Sida umadaa kale ba ka dhex dhacda , ilma Guuleed durbadiidba way isku qabteen dhaxalkii saldanada, ninka la odhan jiray Ducaale "Aftaag" (circa 1788-1877) oo ahaa Ba-Canbaro nin oday ah oo caan ah, dhalayna rag caan ah sida Qawdhan Ducaale (1858-1941), Nuur Ducaale “dhagacun” (1841-1890) iyo Maxamuud Ducaale “candho-eeg” (1839-1907) ayaa markiiba bahdiisa la maagay saldanada, Rooble Guuleed oo xaq u lahaa saldanada markaas wiilasha Guuleed u weynaa ayuu Ducaale u yimi. Ducaalaa yidhi: "Rooblow odaygii waa sakaraad dhawaana waa lagu caleemo saari doonaa, erigooyin badan oo Isaaq iyo reero kalaba way iman , ragaas gurtida ah waa inaad hadaba xoolahaad ku soori lahayd meel ka doontid" Ducaale ayaa Rooble kula taliyay in Ogaadeenka lagu duulo xoolana laga soo maroorsado, sidii buu isna maya ma odhane yeelay ninka Rooble Suldaan.**

**Eeebe haw naxariistee wax yar ka dib ayuu Suldaankii saldanada ee Guuleed xijaabtay isagoo mudo dheer saldanada hayay , maalintii caleemo saarka Rooble yimi ayaa ayadoo caleemo saarkii socodo ama markaas oo loo diyaar garoobayo ayuu ninka la yidhaahdo Ducaale iyo walaalkii Faarax Guuleed oo isku bah ah gurtdii yidhaahdeen " ninkaad boqraysaan saw ma aha ninkaas cadkaas xaaraanta ah idin cunsiiyay, geelaa boolada ahna idinku sooray, reerkii deriska ahaa soo dhacay" shirqoolkaas u soo maleegay Ducaale Suldaan Guuleed marku hirgalay ee laysku buuqay ee odayba dhinac arinka ka eegay ayaa gurtidii Isaaq damacaday inay caleemo saaraan Jaamac , Jaamac oo diidan baa yidhi “geela Bancadeeye iyo boqornimo isugu taag heli maayee, ee Faarax hala boqro”**

**Magan Guuleed oo maalimo u dhaxeeyeen dhalashadiisa isaga iyo Jaamac ayaa hadalkii Jaamac saluugay.Magan oo hoos kala faqaya Jaamac Guuleed iyo bahadiisii,wuxu yidhi "jaamacow walaal ama saldanada ila qabo ama aan kula qabto raggi bah-Canbaro waa kuwaas Rooble isu bahaystee", *marna waxa la yidhaahdaa wuxu yidhi “walaahi haday sidaada bahdaydu sedex tahay boqortooyo ima dhaafteen”* Jaamac oon ogaynba sida looga aragti fogyay baa aad yar ugu jawaabay " walaal aniga kii qabtaaba waa walaalkay ee meel iga tagi mayso" Magan oo cadhaysan baa intu cirka farta ku fiiqay yidhi " nacasyow, walaahi inta xidigahaa inay kaaga fogaan" ka dibna isagoo murugaysan ka dhaqaaqay. Magan oo talo ku ciirsantay Faarax Guuleed oo bah-Canbaro na la boqray,ayaa waxa ka soo hor baxay Ducaale , cadhadii buu intu waran qaaday buu ku tumaatiyay Ducaalana dhaawac kaga tagay, cadhadii**

**reerkiiba intu ka guuray ayuu la dagay Isxaaq (HY). Magan iyo labadiisii bahood iyo 4 u dhalay Isxaaq bay la dageen ceelka Xamaas.**

**Ayadoo arinku halkaas marayo ayaa mudo dhowr iyo toban sanadood ah ka dib Faarax (faarax waxa hubaal ah oo qoraalo Af-Carabiya *"Rislaat Zucumaa Al-Soomaal Ilaa Al-Sheekh Suldaan Ibn Saqr 1837"* ku jirta inu nolaa 1837kii markaas mudo saldanada waa hayay) loo dhisay gabadh Ogaadeen ah (Hure Suldaan iyo Warfaa suldaan u dhali doonta ama Ba-Ogaadeen. Suldaan Faarax baa safar Ogaadeen ah oo magan ah u soo raacay xeebta Berbera. Magan ayaa maqlay safarka suldaanka iyo Ogaadeen, intu Isxaaqgii u tagay ayuu yidhi Safar Ogaadeen ah baa soo socdee aynu ku duulno, markii lagu duulay ayaa la arkay suldaan Faarax oo safarka wada, ayadoo laga hakaday markii hore ayaa Magan ninkii colka waday oo la odhan jiray Dul-Guduud ayuu ku yidhi " magacaa b'a walaalkay indho libaax waan ku ogaaye miyaad ka baqateen" Dul-Guduud ayaa yidhi "waar ma anakaad sidaas na leeday" Dul Guduud baa suldaan Faarax halkii ku dilay, meeshu maanta qabrigiisu yahay ee Xamaas waaka ku aasan.**

**Magan cag ba ma dhigin isla maalintii ayuu ka guuray Isxaaq ka dibna la dagay Cabdi Bari ooy ilmaadeer yihiin oo isla ilma Cabdi Ciise ah. Ducaale Suldaan oo aha ruug cade ayaa arinkii maqlay inu Magan ka danbeeyay dilkii Faarax maantana la yaalo Cabdi Bari. Ducaale iyo Rooble waxay dumaaleen laba nin oo Cabdi Bari ahi ( ilma Maxamed Cabdi Ciisaa) oo ayy yihiin ilmaadeer labad, afar caruur ah oo Cabdi Bari ah ayay labada dumar lahaayeen. Ducaalee ayaa intu u yeedhay Rooblow yidhi dhagayso, si Magan loo dilo oo Cabdi Bari u dilaan caawa markaan yidhaahdo "waar dhaanka raraay" afartaas caruura labadaad haysid na dil ana labadaan hayo baan dilayaa, Rooble oo weli ka samrin saldanadii Ducaale ka khiyaameeyay baa yidhi "hawraarsan".**

**Habeenkii balantu ahayd ayuu Ducaalee yidhi dhaankii raraay caruurtiina laayay, labadii caruur ah marku soo dilay , ayaa hooyadood oon warba hayn aqalkii ka soo baxday oo cirka eegtay waxay tidhi "dayaxi madoobaa" Ducaale ayaa u celiyay "cadaan doonee iska seexo" , markay aqalkii ku laabtay ayuu mise yidhi " Ilaahay iyo Canbaro-Madow kala War L'aa ". Dhankii Rooble marku Ducaale baroor ka maqli waayay salaadii hore, ayaa markii u Rooble arkay, Ducaale waydiiyay Rooble "waar dhaankii ma rarteen" Rooble na ugu jawaabay "dhaankaygagii wuu nagaadee dhaankiina dhaan baas ku fur. Ducaale ayaa markaas ogaaday inu Rooble khiyaameeyay oo caruurtii layn , Ducaale baa yidhi " ma ninkaan labaatan jir ku khiyaameeyay ayaa lixdan jir igu**

khiyaameeyay".

Cabdi Bari markay maqleen dilkii caruurta ayaa meel fogba may tagine , Magan Guuleed iyo afartu dhalay bay soo qabteen , mid markaas dhashay oon 40tan bixin bay naagta Ogaadeen Magan u dhashay, ninkii Cabdi Bari u hadlaayaa yidhi "iska daaya intu naaska ka jaqayo". Magan Guuleed oo og in la dilaayo isaga iyo wuxu dhalayba ayuu gabyay:

Magliyada lay rabinyo iyo muuno kici waaga
Mawdkaa lay sheegay iyo madi ahaantayda
Sida ceel marooro leh tashigan igu dul meeraaya
Ma ogtahay Allahayow adaa miid ii bixin doona

Magan iyo 4tu dhalay ba waxa laga furi waayay nin la odhan jiray Kaahin Baxse oo dhaliinyaro ahaa oo markaas caruurtu laayay Ducaale u adeer ahaa walaalkiina dhalay. Goor danbe oo is yidhi kii yaraa ee gabadha Ogaadeen naaska siinaysayna raaci ayuu ku soo baraarugay meeshii oo cidla ah, gabadhii Ogaadeen oo la baxstay dicigii yaraa. Gabadhi caro ciidagale ba kuma hakan ee orodkii waxay u tagtay walaalkeed , walaalkeed bay arinkii u sheegtay. Xasan Yuusuf siday caadada soomali ahayd walaashii waa celiyay oo wuxu yidhi "2 gu hayso" ka dibna ku laabo reerkaad u dhaxday oo ka dumaal doono, gabadhii sidii bay yeeshay ilmiina waxay kaga tagtay walaalkeed Xasan reer Guuleedna way ku laabtay waxaana dumaalay Yuusuf Guuleed .

Waxa la yidhi Cilmi Magan abtigii afar halaad buu u lisi jiray , waagu 10 jir gaadhayna gool ayuu u qali jiray ,intaas goolasha loo qalayayna dagaal iyo faras ba waa ku tabo barayay. Habeenki 15 gaadhay ayuu yidhi Cilmow kaalay, jiradaas ridee, waranka afkiisii baa jirdii dhaafi waayay , Xasan Yuusuf baa yidhi 'weli maaha", qaalin 9 jir ah ayuu u garwcay qulubkii ugu daneebaayay marku cunay buu yidhi hada ridee, warankii waa ka dusiyay. Wuxu ku yidhi fardahan Ogaadeen eed fuuli jirtay keebaad qaadan lahayd hadii lagu yidhaahdo mid ka dooro, wuxu yidhi faraska ninka Heybe. abtigii baa ninkii farska lahaa u yeedhay oo yidhi faraska 13 halaad baa la siistaaye, 20 halaad qaadoo i sii faraska iyo kooraaba iyo xakamadaa. Gu'ii uu 17 jir gaadhay ayuu abtigii yidhi waa ku kaas orod ama tolkaa waal ama hayla hadline i dhaaf, ragna ninka adeerkaa ee Yuusuf Guuleed ka la tasho.

Cabdi Bari iyo Guuleed oo la heshisiiyey oo mudo labaatan sanadood colaadii ka soo wareegtay oo geedkii suldaanku fadhiyo oo markaas suldaan Xasan Suldaan Faarax suldaan yahay, ayuu

**casar gaaban Cilmi oo hagoogan oo faraskii Haybe ku taagan soo galay, dhowr jeer marku faraskii toociyay ayaa raggi meesha fadhiyay dareemeen inu ninkani ahayn nin la yaqaan arina u socodo. Cilmi geed u dhaw ayuu intu faraskii ku xidhay halkiina dab ka shitay. Yuusuf Guuleed baa markii lays wada waydiiyay waar ninkan yaa garanaya yidhi , anaa garanaya oo waa ina Magan, Dhallin Ileeye oo Cabdi Bari ah oo madasha fadhiyay ayaa intii marku maqlay faraskiisii ku booday oo yidhi "walaahi sidii tii xoolaad Ciidagale intan ka yaraa". (waxa dhacaday abaar xoolii dhamaysay ,macanii sidii xoolii yaraaday ayay ciidaganle na u yaraan mar haduu ninkii soo laabtay ina Magan)**

**Yuusuf Guuleed oo markaas adeerkii ah hooyadiina qaba ayaa loo diray , Cilmi ragan odayaasha ah ee yimi midna ma yaqaan , wuxu yidhi, ninka la yidhaahdo Yuusuf ma idinku jiraa. Yuusuf baa hadlay oo yidhi adeer wixii dhacay wey dhaceene, Yuusuf oo la hadlaya tolkii baa yidhi halkaas xero ka ooda 100 halaad oo min 4 iyo 5 jir ah halkaana ka ooda xero na kadin adhi ah ,gabadhna gabadh ta ugu qurux badan keena , wixii qoyskiina ka dabar go'ay ba waad dhali doontaa ee colaad waxba ma tartee adeer sidaas yeel, Cilmi baa yidhi:**

- **Adeer Yuusufow ummal nin qaba aamus laga roone**
- **Haduu odayba wiil yar ka hadho ubadka Guuleedka**
- **Oo aabahay lala dhintaan aamusi lahaaye**
- **Afarataan uur wada galnay iyo odaygii weynaaba**
- **Mar hadaanan eegayn inaan arad la waageero.**
- **Ninkii uur nugayl qabaa dad ugu aqoon liita.**

**Wuxu Cilmi Magan ku tashaday horta nimankii walaaladii iyo aabihii dilay inu soo barto dhulkooda iyo dagaankood, waxa jira gabay barashada reerkaas ku tilmaamayo oo laga hayo:**

Bari waxan u tagay reer Cabdiga barashadiisiiye

**Ceelka la magac baxay Dhogor maantna la yidhaahdo Awr Barkhadle ayadoo laga cabayo baa neef xoolo ah miyir beelay , neefkii oo galgalanaya ayaa nin intu kacay nin kale ka qaatay warankii neefkiina ku gawrcay. Cabaar ka dib ayadoo ceelkii laga waraabinayo xoolii oo jeesba jees ka danbeeyay , ayaa nin yidhi Kaahinow ninkii waranka kaa qaatay ma garanaysaa, Kaahin Baxse baa yidhi maya, waxa la yidhi ninkii wuxu ahaa Cilmi Magan. Cilmi baa isna la yidhi waar ninkii odayga ahaa eed waranka ka qaadatay ma garanaysaa , markaasuu yidhi maya ee kumuu ahaa , dee wuxu ahaa ninkii aabahaa Magan dilay ee Kaahin Baxse.**

**Cabdi Cilmi baa is yidhi ninku intaanu raga kaaga dhuuman ka daba kac oo wejigiisa maruun arag, waababkii waagaas makhyaayadu u ahaa somalida mid ka mid ah ayay iskaga soo hor baxeen , Kaahin Baxshe baa gabayga ku horeeyay isagoo le waar ma ninkan laxda gawracanaya baan isla warankaygii ku dilaa baa gabyay isagoo yaraysanaya ninkan , gabaygaas waxa tuduc ka mid ah oo naga soo gaadhay :**

**Haadku ba ma cuno haduu harada neef yaale.**

**Cabdi baa ayadoo waabkii laysu wada eegayo uga jawaabay tix ay ka mid ahayd:**

**Kambalkiina adigoo fadhiya kedinka geeliina**
**Kurka iyo hadaan labada gacmood beyl u kala tuurin**
**kufraan ahay ina Baxshow hadaad kadib aduun goyso.**

**Kaahin Baxse oo ugu maahmaahaya Cilmi inu yahay waxar goor xun oo jilaal ah dhashay oo ama ahayd in dhagaa la jaro ama ahayd in la gawarco sida soomaalidu caada u tahay (dumarkaa dhagaa jara ama gawarca maqasha jiilaalka dhalata) ayaa wuxu ugu jawaabay :**

**Sidii dixi jilaal dhashay oo dumarkii soo reebay**

**Dusha Faarax baad kala sinayd duudna kaa dhigaye**

**waxa lays eegtaba maalin maalinaa ka mid ah ayaa Kaahin Baxse oo geel wadeeco ah soo raad raacay iyo Cabdi Cilmi iska soo hor baxeen, halkiii wax laysku galaba lays rogrogaba akhrikii Cabdi Cilmi baa itaal roondaay oo ka dul maray odaygii Kaahin , warankiisii intu far iyo suul ku qabtay buu ka kudkudiyay Kaahin Baxshe halkiina ku dilay.Warankii iyo labddii hooto ee Kaahin intu ka garab qaatay ayuu Cabdi Cilmi gacantu kaatunka ku xidhnaa Kaahin ka gooyay. Kaatunku gacantay ku jirtay iyo hubkii Kaahinba isagoo wata ayuu la dul yimi tolkii, ciiradii faraska markii la arkay sida xawliga ah ayaa la wada kacay, marku faraskii ka dagay buu Cabdi Cilmi yidhi :**

**Dayaaye iyo Gulaanow warkii layga wada doonay**
**Doqoniimo labadiina dacal iyo dad igu faaleeye**
**Duurkii libaaxley ma galay dihashadii deyrta**
**Dig ma siiyay dooxanii ma riday duhurko oo taagan**
**Ma duunuunsaday dhiig iyo intaan darab ka qaadaayey**

Reer Adan dabar gooyo iyo dilinto maw reebay
Ceebeey ma soo diray fariin digasho waayeele?
D'dayda cali rooble iyo dudub ma geeraaray?
Guuleed suldaan dayr iyo garab mayla daba qaaday
Dunta nimanka dheer baan ahee damal ma lay waabay.

Dilkaasi wuxu sababy dagaalkii Cabdi Bari iyo reer Guuleed , oo colaad dheer abuurtay dilkii Kaahin Baxse , oo Cabdi Bari ka samri waayeen , inkastoo niman fara badan oo reer Guuleed ah ayaguba dileen. Cilmi Magan se colaadaas oo socota kuma dhimane waxa dilkiisi ka danbeeyay nin Arab ah oo u ku dilay hal baadi ah. Marki u ninkaas dilay ayaa isagoo la jooga Ogaadeen iyo abtiyaashii isagoo geed hoos jiifa ayaa waxa helay nin ay ilmaadeer ahaayeen ninkii u dilay, intu warankii Cilmi ka ag qaaday ayuu cilmi oo weli jiifa halkaas ku dilay, Cilmi waxa xaaskiisii dumaalay Xasan Yuusuf Guuleed oo ah ina Yuusuf kii hooyadii dumaalay, waxa caruur ahna wuxu ka tagay Cabdi Cilmi, qiyaas ahaan wakhtigaas Cilmi Magan la dilay waxay ku beegnayd 1860gii.

Halkaas marku xaaju maraysay, ayaa waxa dhintay Suldaan Xasan Suldaan Faarax mudo ka dib. Suldaan Xasan wuxu dhintay qiyaas ahaan 1866 , suldaan Xasan caruur waxa ugu weynaa Diiriye Faarax oo markaas ahaa wiil yar oo caruur ah, se ragay walaalo ahaayeen baa badnaa , Xasan waxay walaalo ahaayeen oo markaas ugu weynaa:

1-Xirsi"Jabane"oo ina Faarax ah

2- Warsame Faarax iyo

3-Nuur Faarax "Taye" iyo Maxamed Faarax oo (ba-Ijo ah)

Waxay noqotay hadana in suldaan ragaas laga soo xulo somalidu waxay ku maah maahdaa "Qoysna boqorkuu leeyay qabiilna xulashada" suldaan marka la boqorayo 40 nin oo ruug cadaa ah oo gurti ah iyo geed jooga reer hebel baa arinkaas gorfeeya. Suldaan marka la dooranayo iyo boqortooyana waa kala laba arin , oo boqor waa dhaxaltooyo oo ninka boqorka u xiga doqona ha ahaadee kaas baa qabta xilka ama dhaxla. Haba loo xidigeeyo xataa ee somalidii hore aad iyo aad bay uga fiirsan jirtay marka suldaan la boqrayo. Sifaa iyo calaamadaa somalidu hore ku xulan jireen saldanada waxa ka mid ahaa:

1-Aftahanimo
2- Deeqsiiinmo

3- Maal qabeen reer soorrayn kara
4- Fulay xoolihiisa nabad siista oo dagaalka ku dagdagin.
5- Axmaq geesi ah marku nabad ka quusto.
6- Nin rag ugu dul iyo dulqaad badan.

Waxa kaloo la odhan jiray suldaan waa ninka:

1- " cad la jiiday camuud ka qaada" canaanta nin u adkaysta.
2- "Intu calool geel ceel dhanaan ka qaadana" cadhada waa inu liqaa,.
3-"Inta cadaawe dheere cidaad ka qaadana" culayska waa inu xamilaa oo maritida iyo socodka u adkaystaa.

Intaasi waa marka la dooraayo ee gurtidu ka doodayso , waxay kalooy odhan jireen:

1- maroorsade yaanu ahaan muraadkiisa qoonsada.
2- maraaci yaanu ahaan haween meelahaa la shira.

Ninka la yidaahdo Ducaale oo d'a ah oo saldanad inu hantiyo 2 jeer oo hore dhaaftay ayaa soo duubtay iyo Nuur Tayo iyo Hure Suldaan Faarax. Ducaale oo markaas raga adeer ugu toosnaa inta ilma Faarax kuwa ilma Xasana ugu toosnaaba awow ayaa saldanadii ilaa maalintii aabihii Guuleed dhintay ilaa walaalkii Faarax ee mar kaste dagaalka ugu jiray inu marna bahdiisa ku ilaaliyo marna kuwu adeerka u ahaa sida Suldaan Xasan, ayaa markan maadaama u d'a yahay damcay inu aakhrikii hantiyo. Ducaale ragii kale oo dhan ma eegine wuxu ka baqday ninka Nuur Tayo , Nuur u adeer ugu toosanyay ayuu hooyadii guursaday Ijo oo ahayd reer Sugule. Ragana wiilkii yaraa ee Suldaan Xasan caruurtiisa ugu weynaa bay ayaguna saldanadii u soo taagan waa Diiriye Xasan oo markaas ahaa 15 jir ninka shaacirka ahaa ee Cawd Qamaan (Gobdoon Dhamal) ku guntaday in la saaaro boqortooyada.

Ayadoo halkaas laysla maraayo ayuu Ducaale intu rag gurti ah oo markaas isagu watay is yidhi halagu caleemo saaro, Nuur Tayo iyo Warsamae Faarax oo wata 32 reer Faarax ah ayaa geedkii yimi, markaas bay raggi wada aamuseen , nin baa yidhi waar maxaa loo hadli waayay , markaasuu mid kale yidhi ' maxaa loo hadli raggii lahaa saldanada yimiye". Ducaale oo arinkiisii quus ka taagan oo ilma Faaraxna u midoobeen inaanu adeerkood ka qaadin saldanada, ayaa Xirsi Jabane oo isagu ahaa curudkii Faarax ayaa maalintaas geeda ku yimaadeen 32 ka nin yidhi Faarax “waar saldadandii ka waran” , Nuur Taye oo og waxa loo dhaafiyay Xirsi ayaa ugu jawaabay “ Laba Ba-Ijo ah iyo nin iin leh ba loo diid “

**Warsame oo Ducaale ku haysto saldanada , Xirsi na saladanadii la dhaafiyay ayaa maalintii danbe Nuur Taye iyo nin Sacad Muuse ah oo reer Samatar ah oo ay Ducaale xidid yihiin intu Ducaale waayay kiina dilay faraskii Ducaale Aftaag na kaxaystay, Nuur Tayo oo cudud ugu faanaya iyo tiro adeerkii Ducaale baa yidhi adeer faraskayga i sii ninkaad dishay anuu dan kama lihiye , Nuur baa yidhi:**

**Ma reer Faarax baan kowmiyey oo kun iyo dheeraada**
**kooraha miyay toban sitaan kululihii qeylo**
**Ma labaatan baan kula kaftamay kedinka geelayga**
**Ninkii faraska keen yidhi miyey kiisii noqon weyday**
**Kalaamku geedka sow ma noqon, kaan u odhan doono**
**Jeerow kalkeed iga yimaado, killi miyaa xaajo.**

**Halkaas marku Ducaale oo gaboobay ku hadhay , ayaa waxa lagu heshiiyay in la boqro Warsame Faarax, ayadoo loo balansanayay in Warsame Faarax la boqro ayaa reerka Ogaadeen oo markaas yaalay ceelka Daroor dagaal dhex maray reeri , Warsame dagaalkaas baa lagu dilay ceelkaas Daroorna waa maalintu gacanta soo galay oo qiyaas ahaan ahayd 1870. Waxa arinkaas ka gabyaya Nuur Taye gabay uu naga soo gaadheen 2 tuduc:**

**Walee reer Wejalaan kadin waran cadle soo siinin**
**Walee wiil la dilay baan Warsame weydi loo noqon**

**Saldanadii hadana dib ayay u dhacday , ayadoo arinku sidaas yahay ayaa waxa dhacay dagaalo fara badan oo reeraa gudihiisa ah ooy ka mid yihiin dagaalkii "Lafo Deylo" oo bah-Deylo aad loogu dilay. Niman ay ka mid yihiin Sharmaarke Adan iyo Cawd Qamaan baa yidhi waa in Diiriye la boqraa reerku sidan ku jiri maayo , Nuur Tayo baa arinkii maqlay , Nuur Tayo ayaa inamadu dhalay oo Adan Nuur u weynyay faray inay soo dilaan Diiriye oo markaaas caruur ah oo ilaa 18 jir ah. Habeenkii u diray subaxii ku xigtay marku Nuur wax baroor ah maqli waayay ayuu inamadiisii isugu yeedhay marku ogaaday inaanay arinkii fulin. Adan Seed baa yidhi waxanu u diliweynay waa inadeerkay aabihiina waa adeerkay , Nuur oo la yaabay wiilka yar iyo saldanadu la damcsanaa dhashiisa ayaa intu gabayay yidhi:**

**Rag baa yidhi muskii hooyadii maydhaq uga gooya**
**Rag baa yidhi maqaar saar ku daya wuu miliiliciye**
**Waataan mulkiyey ciidagale madi ahaantiiye**
**Waataan mudh soo idhi markaad iga maqnaydeene**

**Miisaanka reer Nuur miyaa midabo loo waayay**
**Malkadaan ku waday Aadan Seed dib uga soo maagye**
**Caligay mudadu noo xidhanayd madashii beeneeye**
**Diiriye macagankii ammaan ma aha cankiise?**
**Rag nimaaan miligihii aqoon midigta yaa gooya?**

**Cawd Qamaan iyo rag kaloo gurti ah ayaa waagii danbe boqray Suldaan Diiriye intaanu dalku Ingiriisku iman wakhti ku siman 1879-1881. Waa wakhtigay bilaabmeen dagaaladii Arab/Gobdoon iyo Ciidagale+Isxaaq oo isku dhinac ah. Nuur Tayo ayaa ayadoo dagaaladu socodaan ku gabayay isagoo le hadii aniga lay dooran lahaa sidani ma dhacdeen:**

**Haday alalegti aniga tahay lama idlaadeene**
**Geelii irdaha weyn lahaa inaba yaa daajin**
**Isha baryada yaa idinla tagi arinka liitooba**
**Maxamuud hadii iilka la dhigo yaa armin doona**
**Maantana ilmaadeeraday Arab miyaa laayey**

**Cawd Qamaan oo isagu ahaa raggi la saftay Diiriye ee u guntaday in la boqoro oo imikana Arab isku huwan yihiin ayaa wuxu arkay Suldaankii yaraa oo ag fadhiya adeerkii Nuur Tayo iyo awowgii Ducaale markaasuu la yaabay ninkan dhex fadhiya kii is yidhi boob iyo kii is yidhi dil , markaasuu isagoo xasuusinaya dhibaatadu u soo maray awgii yidhi:**

**Suldaanow dirirtii**
**Dagaalkii barigii**
**Dooda waanad ogayne**
**Ninkii doob kale qaatay**
**Iyo ninkii kuu diriraayay**
**Dad makuu simanyiin?**
**Goday ifka ka buuxdoo**
**Misna gaardiyaaya**
**Libaaxna gaadh ka hayo**
**Qoladii gamadee**
**Gam tidhihadaano ahayn**
**Suldaanow godka weyn**
**Garmaamii fardihii**
**Go'aalkooda rogaalka**
**Nimankaan gabanaynee**
**Garcaano ahayne**

**Cabdi Cilmi Magan wuxu qaan gaadhay waagaas la boqray suldaan Diiriye oo ku beegnayd 1880’s, colaadii weli wey socotaa cidna**

**cid lag lama xaalin magna lama kala qaadan. Caleemo saarkii Suldaan Diiriye Xasan ka dib ayaa waxa dhacday colaadii Arab iyo Ciidagale iyo Isxaaq oo dhinac ah waxa Arab ku biiray reerka Gobdoon oo la baxay Huwan, waxana sababay gaashaanbuuraysigaas gabadh la odhan jiray Makka oo u doonanayd nin Gobdoon ah ayaa ninkii gabayaaga ahaa ee la odhan jiray Nuur Dhagacun gabadhii ninkii ka qaaday Gobdoon oo Cawd Qamaan hogaaminayana arintii ka gilgisheen sidaasna u guureen oo Arab ku raaceen. Cabdi Cilmi oo dagaaladaas kaalin culus ka galay ayaa mar wuxu ku gabyay isagoo Arab ka goodiyaya oo markaas waran Bulaxaar iyo Berbera loogu soo tumay:**

**Warankaan samaan iyo samaan saaxil ugu baanay**
**Ma kuwaan sugayey baa Sibi u dhaw haatan**
**Ma Subeer Celi iyo bah-Cadaa samada hoos jooga**

**Cabdi Cilmi wuxu ku dhintay goobtii “Mariyaay” ee ka horaysay Balaadh iyo Indho-Gube ee ay ku guulaysteen Ciise Dhamal iyo Isxaaq, dalkaasi oo Somalida cid kaste gaadhay waa kii Ina Cabdulle Xasan waayo danbe isagoo gabayaya ku soo daray gabaygiisa isagoo leh:**

**Masalaba kol bay soo baxdaa magac la siiyaaye**
**Mariyaay anay ii eekayd maalintii hor’e**
**Magac buu ka helay Ciise Dhamal meel uu joogaba**

**Suldaan Diiriye ayaa Meygaag Ilkodheere oo la taliyihiisa ahaa nin aad u fogna ahaa baa yidhi “saldanadaadu salndanad noqon mayso ilaa aad colaadan mudada jirtay soo af jarto" ayadoo la hadal hayo in mag laga bixiyo Kaahin Baxase oo colaada la soo af jaro, ayaa waxa maqlay gabyaagii iyo abaanduulii Xuseen Xasan Rooble Suldaan Guuleed, Xuseen oo og in Kaahin Baxse jilibkiisii gaar ahaan nin la odhan jiray Xirsi Cabsiiye ku dhaartay inaanu aqbalyn duudsi ee u ninkooda mag ka qaadanayaan ama colaadu soconayso, Xuseen oo midhkaas Xirsi Cabsiiye daba taagan ayaa Suldaankii ku yidhi , waar Kaahin maxuu rag dheeryay ee magta looga bixinayaa, Xuseen oo Suldaan Diiriye la hadlaya baa mar ku gabyay:**

**Lix nin oo mankiyo shaalka iyo midhaha Guuleeda**
**Oo wada ma dhaafta ah ragii ugu maloongeeyay**
**Inaan weliba maal ugu daraa waa masalo dhaafe**
**Waligeed markaha looma culin magaanu soocnaaye**
**Waa waxaanay dhagaheygu maqal maanta ka horoowe**
**Inaanaan cayuun soo madheyn mudhayo dhaadheer leh**

**Hadaynu Reer Mataan nahay sidaa waydun maan garane**

**Suldaan Diiriye baa arinkiii ku raacay Meygaag Ilkodheere in mag laga bixiyo Kaahin Baxse , Xuseen Xasan baa markaas eri aan saldanada qaban ku yidhi Suldaan Diiriye, dadka qaar baa meel hore arinkaas ku soo dara se halkaas bay ahayd marku Xuseen suldaan Diiriye eriga ku yidhi.**

**Wax jirtay reerka Guban yaala ee Habar Awal iyo Ciidagale arin dhex maray isla wakhtigaas, colaadaaswaxa lagu heshiiyay 7 faras iyo 5 hablood oo godob reeb ah, Ciidagale oo fardii laga sugaayay ayaa arinkii ka raagay ayagoo gabdhiina qaatay, Meygaag Ilkodheere ayaa ku taliyay in siday magtu u baxdo oo loo kala qaato ninka diidan ee abaanduulaaah ee Xuseen Xasan loo qabto , waa in Berbera iyo dhulka Habar Awal loo diro si ay arinkii waagii ugu qabtaan. Ayadoo laysla ogyay wanjalka ayaa Xuseen Xasan la yidhi safarakaas u raaca Berbera , Xuseen oo maraysan waxna ogayn baa Berbera ugu gacan galay Habar Awal, ninkii Habar Awal u hadlaayay baa yidhi " waar ninkii hablaad bixiseen fardahoodii lagu keeni lahaa waa kan" sidii baa Xuseen Xasan maamulkii xeebta ee Ingiriis Habar Awal u adeegsadeen Xuseena u xadhig galay. Xuseen weli ogaan shirqoolka loo maleegay baa gabaygan ka soo mariyay Berbera isagoo tolkii halku ka taagnaa iyo inay tabayaan xasuusinaya , Xuseen wuxu yidhi:**

**Senge turuqyo weynoo ninkii lahaa toocin kari waayay
Halkaan kaga tuuri jiray saw la tabi maayo
Marti toban habeen soo dhaxdoo oo timi halkaan joogo
Tulid geela inaan gawracaad igu tiqiineene
Gacantaan tashiimada aqoon saw la tabi maayo.**

**Isagoo weli ku jira xadhigii , welina tolkii sugaya ayaa Xuseen oo dareensday inay wax jiraan gabaygan taariikhda somali galay diiwaankii waxbarashadana ka hir galay soo mariyay, waa gabayga eri Suugaan oo ah doog ama caws xili gaar ah reer guuraaga soomali helaan murtida soomaali ku tilmaamay, gabayga eriga soomaali Suugaan ugu wan qalay Xuuseen wuxu yidhi:**

**Suugaanta gabay marbaan saabudayn jiraye
Maansada ma saransooriyee waan sidiqyaaye
Soofaha lab baan kaga jaraa saxalka feedhaaye
Anigoo siyaakhiyay bay sare u qaadaane
Markaasay safruhu ula kacaan Sedo Mareexaane
An sifeeyo caawana tixdaan saaxil ka abaaray
Si Alle iyo faduul baan ku imi sabadan xeebeede
Ninba sadada meel baa Ilaah ugu sameeyaaye**

**Anse teydu waxay saarantahay sudiyo geel waabe.**
**Senge dhabarkii seymo iyo col baan saami ku lahaaye**
**Abidkayba saar iima qaban suddhan doonyaha'e.**
**Suldaanka iyo Meygaag miyaan sixin khabaarkayga**
**Saaxiibkay Maxamuud miyaan sidatan loo sheegin**
**Isagaa xaajadan sirgaxan saababayn jiraye**
**Sulubku cigaal dhalay miyaa seegay marinkiisa**
**Sir iyo caad samaan iyo xumaan waxan sameeyaaba**
**Amba waan ka soo saari jiray seymo kii galo'e**
**Sahalanaa amuurteydu sow lalama sooyaamo.**

**Soomaha colaadeed hadii siigo kor u duusho**
**Sengiyaal marmaariyay hadii seyrin lala maaxo**
**Saablayda feedhaha ragay seeftu kala goysay**
**Iyo niman saraaya u lada weerar lagu seydhay**
**Goortu Fuluhu seyraari jiray saajicnimadayda**
**Surayadaan ka soo rogi ogaa surinkii yaw joogsan?**

**Hadii sabo Xareed la dego Sud iyo Gaarwoodi**
**Awal iyo Zubeer oo dhan baa kaga siyaabnaaye**
**Geelaan silsilada u aha sudihii yaa Daajin?**

**Marti socota goor gaaban oo soofki laga maalay**
**Bakhayl waa sidqaa marku seexdo aqalkiisa**
**Sumul gawracaa iyo maraan gool sibraha gooyo**
**Soortaan ku haasaawin jiray saheydii yaw keeni?**

**Haduu xaal sokeeyaa soo dhex galo waa surdumo jaane**
**Shir la simay hadii loo balamo sa'danbe iyo Geedka**
**Suldaanka iyo Meygaag marku hadalka saysaydho**
**Magan waa sangiiggaa ee marku seego erigiisa**
**Ragbaan hadalka saafine murtidu seef ka qaroweyne**
**Anuu saarku ii wada hayaa sawdka odhahdiiye**
**Rugtaan ku saamiri jiray saajicinimadayda**
**een anigu saamiga u lahaa sahalka yow sheegi**
**Gartaan ku kala saari jiray nimanka yow soori**
**Siraadka iyo bilbilahaann laha sare yow qaadi.**

**Dhaliinyradu sabuuxaa ka badan sararta Daauude**
**Sargadaa haday ila dhacaan sumamka la adkeeyay**
**Saxal iyo mariiq baan ahoo wow suul dhigiye**
**Saafigu qalbigu ahaa samihii yaa yeeli?**
**Sal cadeeye iyo reer Iidle iyo laba Saleemaanba**
**Nimankaan anigu seetayn aqiin xadhiga yow soohi?**

**Waxba yaanu hadalku ila sudqine waxan ku saameelay**
**Nin i siray iyo ninkii ila saftay iyo kaan sinba yeelin**
**Mid kaste wixii iga sudhan waan ka saakumiye**
**Sahlanaa amuurteydu sow lalama sooyaamo**
**Ma sed yara intaan salaad iyo saxaiyay tawxiide**
**Suudaan madow hay qoro soonka dabadeede**
**Saaqayga ee keen Cabdow samar Allaa jiro'e**

**Markuu ogaaday in arintu u xidhanyay ahayd shirqool loo soo maleegay , ayuu Xuseen gabaygan mariyay isagoo dhinacna ka sheegaya falalakiisii faraa badnaa lib iyo gudoba ha ahaadaane,dhinaca kalana ku canaanaya nimanka kalee ku eegaya xabsiga Berbera ee 30ka Hindi iyo Habar Awal ku hayaan.**

**Xuseen Xasan wuxu yidhi:**

**Arbayaal maroodiya haduu adame soo laayo**
**ilkuhu ka soo goray hadii Iimay laga keno**
**Wuxu soo itaalaba haduu Awdal soo galiyo**
**Nin abaan u sheegtay iyo ninki kala ag loolaayey**
**Adyad kii ugu joogsadayna waa ka ardnaadaaye**
**Arintii marka ay la dhigay lays ilaaqaayay**
**Waayaan abaabayn ku diray Arab colkiisiye**
**Waayana asaliga reer Cabdiga awlax u lulaye**
**Waayana Ayuub kaga guntaday amarki geelqaad**
**Isaaq iyo Hartiba maalintii ururta loo joogay**
**Waayana suldaankii ku idhi halaan la eegayne**
**Rag ilmo yar haystaa ka baqa mawdka sii umo'e ???**
**Aarkii Daboolana ku dilay aydu jiifsadaye**
**Oday kala bahaanu nahay haday ficil iloobeene**
**Wax se uur ku taaladu jirtaa aanadan ridaye**
**Albaabdan hadii layga furo laygu eegaayo**
**Anoo awlaxyada weyn sita oo ilamadii jooga**
**Oon lay ilaaqayn hadaan miduun unuun gooyo**
**Aniguba abaal weysu gudi eedna waa sugiye**

**Intii Xuseen Xasan xidhnaa oo mudu ku siman ah 1884kii ayaa reerkiisi duulay oo geel Ogaadeen ka soo qaaday, ninkstaba 10 halaad ka helay, abaandule waxa ka ahaa Caashuur, faraskii Dhukay oo u lahaa abaanduulaa Ogadeena waxa qaaday Dhuule Yuusuf Guuled,ninkii abaanduulaa Ogaadeenka u ahaa ee IL Qarshe waxa waran la helay oo dhawaacay Cawaale Qoobcade, Hashii Geeraarshana waxay ku hagaagtay qeybtii Hure Suldaan Faarax.Halkii laga sugaayay colaad Xuseen ku saabsan arintii shirqoolka ahayd ee u mudada u xidhnaa , ayaa taaba kama hadline waxa kala weynaatay arinta danbe isagoo eed u sheeganaya**

**guushaas isagu ishraasaday ee libteedu u ka qaday ayuu suldaan Diiriye geeraarkan kula hadlay le libtii layma hanbayn:**

**Duunyadaan u baxaayay**
**Duuflaalay u amreenoo**
**Cashuur bay u direen**
**Hootadaan darbinaayay**
**ee Ragan doonan aqoona**
**Cawaalaa dabuuriyey**
**Darmaankaan la hadhaayeyna**
**Huraa daajisanaaya**
**Geeraarkaan dawaxaayay**
**Nuur Ducaale suldaan iyo**
**Dibnahayga ha joogtee**
**Dad kaleeto aqoona**
**Deelqaaf bay u tirsheen**
**Afrtaa dibindaabyo**
**oo dabadeed la sameeyay**
**Duntasare la moodyow**
**Kan ka doonan lahaa**
**Suldaan dawga ka rawo**
**Dacwadaydana qaad.?**

**Markii magtii lagu kala qaatay Herer 1888kii colaadii bilaabmatay 1810kii ka horna la soo af jaray ayaa ninka Xirsi Cabsiiye la yidhaahdo ee ahaa Kaahin Baxashe inadeerkii marku magtii qaatay la yidhi dhaaro inaadan gabay danbe arintan ka tirin doonin colaadana cusbaysiinayn, Xirsi baa ka dhaartay gabay cusub se wuxu yidhi wixii dhacayaan hadhaceene mid mudaba ii tirisanaa oo laygu marag furayo baan marin, intu laba gool ka gawarcay ayuu ceelka Herer ( oo markaas Hargaysa la odhan jirin) gabaygan ka mariyay:**

**Tartaraha bilaawaha markaan toos isugu jiiday**
**Labadii tunnaa iyo markaan teeriyada qaatay**
**Goortaan gundhowrka u tuntumay turiska gaashaanka**
**Qabiil tab iyo xeel badan arin wow wada toose**
**Markii laysku taagsaday arini teydi ma ahaatay**
**Guleed miyaan tolay sidii igadh tariiqaysa**
**Tartarkooda maw qoday hadaan toobad kala weynay**
**Inna tiigsimaad Ciidagale iyo tahana maw diiday**
**Sidii cawl tuur lagaga hadhay maysu wada tuubay**
**Ma ku tuuray meel dheer waakaa tagay Ogaadeene**
**Taandhooyinkii Herer wixii tiro Isaaq joogtay**
**Gobabkii tilmaanaa markay taami ololaysay**
**Dixda roobk badan tiixaya waa timacadiisiiye**

**Waataad tubnaydeen markaan tayda iibsadaye**
**Tifta deyrta boqol ticiyood timacad maw keentay**
**Aftaayada lama dhigee taa wax ku hagaaja**

**Colaadii socotay qarni badhkii halkaas bay ku dhamaatay, Xuseen oo waa danbe ka soo laabtay safar baa la yidhi magatii waa la kala qaatay , wuxu yidhi waar magta iga daayoo ninkii Xirsi Cabsiiye ma gabayay , marku Xuseen maqlay gabaygii Xirsi ee digashada ahaa ayuu gabayan calaacalka ah ee midhahani naga soo gaadheen tiriyay:**

**Intu taray intu naga tafay tahana wax dheeraaye**
**Taladii Suldaan Diiriye iyo tacabkiii Meygaag dhe**
**Oo midhayo tiiqtiiqsiya iyo taana maw raacday**
**Halka talada Guuleed suldaan tiiro loo dhigaye**
**Maxaad meel kale ugu tuuraysaa talo xumaantaada?**

====================Dhamaad========================================

**Fiiro Gaar ah: Gabayadu badankood waa maqanyihiin intan laga hayo een so qorayna ma wada dhama mana saxsana , inta la hubo arintaas waxa laga xasuustaa 13 gabay , waxay tiriyeen reer Magan-Gaabo iyo Waxay tiriyeen reer Kaahin Baxse iyo gabayada Xuseen Xasan. Waxan taariikhdan ururiyay 2007, mar 2009kii cajalad laga soo duubay gabayadan oo dhamays tarin qorsheeyay, oo Hargaysa niman odayaal ah laga soo duubay, ayaa nasiib daro ninkii cajalada loo soo dhiibay oo la odhan jiray Maxamed Maan-Garad oo reer Hargaysa ah cajaladii rahmay oo dhuuni mooday sidaasna gabayadan oo dhamays tiran iyo qaar naga maqanba lagu waayay.**

Rashid Jaama

Gusuf78@hotmail.com